



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Janaayo 8, 2020

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS (Hay'adaha Maamulka Kiiska: fadlan si ballaaran u wadaaga, oo ay ku jiraan daryeel bixiyayaashu. Daryeel bixiyayaasha waxaa la ogeysiiyaa iyada oo lagu saleynayo email la geliyo eXPRS)

Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka Ujeedada: Macluumaad cusub oo ku saabsan Wajiga 1 ee Tallaaka COVID-19

Dabayaaqadii Diisambar, waxaan diray [fariin](#) wadata macluumaad bilaw ah uu ku saabsan tallaalka COVID-19 iyo waxa imaatinka tallaalku uga dhigan yahay dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD), iyo qoysaskooda iyo shaqaalahooda taageerada. Xaalada ku saabsan tallaalkadu waa mid si degdeg ah isku beddelaysaa iyada oo farriintanina tahay in ay kula socodsiiiso macluumaadka aanu waqtigan la joogo hayno.

Janaayo 5, 2021, [Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa ogeysiiyay Mas'uuliyiinta Caafimaadka Dadweynaha ee Degaanka](#) (LPHAs) in tallaalka la siin karo qof kasta oo ka tirsan Wajiga 1a, Kooxaha 1 – 4. Tani waxaa ku jira dhammaan dadka qaba I/DD ee ka tirsan adeegyada ODDS, xubnaha ka tirsan qoyska iyo guriga xubnaha qofka qaba I/DD, hay'ada daryeelka bixisa, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed iyo shaqaalaha kale ee adeega tooska ah siiya dadka qaba I/DD iyo dadka kale ee halista sare ugu sugan. ODDS ayaa abuurta [xaashida xaqiiqda](#) oo wadata macluumaadka kooxda Wajiga 1a. Waxaa sidoo kale jirta [xaashida xaqiiqda oo gooni ah](#) oo ku saabsan dadka qaba I/DD si loo gaaro go'aan ku saabsan tallaalka.

Marka laga hadlayo helitaanka loogu talagalay dadka kala duwan ee ka tirsan adeegyada, guryaha dadka waayeelka ahi koox ahaanta u degan

yihiin iyo guryaha daryeelka dadka waayeelka ah ee I/DD ayaa loo diiwan galiyay Barnaamijka Iskaashiga Farmashiyada ee loogu talagalay Daryeelka Muddada Fog: <https://www.cdc.gov/vaccines/covid-19/long-term-care/pharmacy-partnerships.html>

Guriga dadka waayeelka ahi koox ahaanta u degan yihiin iyo guryaha daryeelka dadka waayeelka ah ee I/DD ayaa isla imikaba uu la xiriiray, la xiriiri doonaa wakiilka Walgreens, CVS ama Consonus si la iskugu duwo qorshaha tallaalka rugta caafimaadka. Mas'uuliyiinta Caafimaadka Dadweynaha ee Degaanka ayay dhici kartaa in ay sidoo kale tallaalo siiyaan shaqaalaha iyo dadka u adeega goobahani.

Marka ay noqoto dadka hela adeegyada guriga-dhexdiisa, iyo sidoo kale taageerada hawlaha maalintii, adeegyada shaqo iyo bixiyayaasha adeegyadaasi, la xiriira CDDP degaankiina (Isku duwaha Adeegyada) ama Hay'ada (Wakiilka Shaksi) wixii ku saabsan la shaqeynta LPHA degaanka.

Xaaladu si degdeg ah ayay isku beddelaysaa, waxaanan intii karaankayaga ah isku dayi doonaa in aan qof kasta la socodsiino marka aan helno macluumaad dheeraad ah.

Su'aalaha ku saabsan tallaalka COVID-19 waxaa si toos ah loogu diri karaa: COVID19.Vaccine@dhsosha.state.or.us

Bogga internet-ka ee OHA ee tallaalka guud ee COVID-19 (isku diiwaan geli helida macluumaadka cusub) waa: <https://covidvaccine.oregon.gov/> iyada oo bogga internet-ka ee tallaalka daryeel bixiyaha u gaarka ah uu yahay: <https://www.oregon.gov/oha/PH/PREVENTIONWELLNESS/VACCINES/IMMUNIZATION/IMMUNIZATIONPROVIDERRESOURCES/Pages/COVIDvaccine.aspx>

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty

Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Fariintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo
[*wax ka ogow website-keena.*](#)

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.